

FGM: Maxaa iga qaldan?

A: asc la taliye

B: wcs soo dhawoow sideen kuucaawin karaa?

A: dhakhtarka dumarka aayaa ii kaasoo diray, warqad wareejin hospilana wuu isiiyey, waxaana haysto dhibaatooyin caafimaad, tusaale ahaan , Waxaa i haya infegshino soo noqnoqda, waxaan xanuun ka dareemayaa dhabarka hoose iyo caloosha, markii ay caddadu igu dhacdo xanuun aad u weyn ayaan dareema.

Sidoo kale markaan guursaday xanuun dartiis ninkayga lama seexan karo.

B: ma arki karawarqada?

A: dabcan ,hoo

B: warqada Waxaa kuqaran in lagu soo guday, waad fahamsantahay waxaa laga wado? Guddniinka macnihiisa iyo dhibaataadiisa way kuu cadahay soo ma aha?

A: Annigu markaan 7 sannno jiray ayaa lay guday. Maxaa ka galay xaalada hadda i haysa! Aniga iyo gabadha walaashay ah waana laguday, dhamaanteena nolosheena caafimaad way wacantahay. Guddniinku waa caafimaad, diin ahaan waan nadaafad, hablahana waa u asturaad.

B: waangrty, dumarka badan kood waxay guddniinka ka aaminsan yahiin inuu asturaad u yahay. Guddniinka fircooniga ama midka Sunaha loo bixiyay, nabiga NNK waa laga been abuurtay, hablihiisana ma guddin , gudniinka hablahana waa suno ma ma odhan.

Si kastaba ha noqoto, warqadaan Waxaa ku qoran in fircooni lagu guday.

Dhibatada hada ku haysatana asagaa sabab u ah. Waxaad igu tiri gudniinku waa Asturaad iyo nadaafad, taasuna run ma aha. Gudniinka dumarka waxey leedahay cawaaqiib halis ah ee caafimaadka gabdhaha iyo dumarka, qaar ka mid ah way u dhintaan sabab la xiriirto natiijada jarida xubinta taranka. Asturaadu “chastity” waa siduu qalbi gaga iyo caqligaagu nadiif u yahay mid kuxiran. Asturaada waa tarbiyad gabdhaha iyo wiilasha in la baro u baahan iyo mujtamaca. Asturaadu ma aha gabdhaha yaryar in xubnahooda taranka la jarjaro oo dhibaatooyin wayn loo gaysto oo jidhkooda haybadiisa la badalo. Guddniinka noocuu noqdaba ma aha wax gabdhaha u fiican khasatan mid ka fircooniga ah sababto ah waxaa la

xira oo la tolaa daloolka kaadida iyo caadadu ka soobaxaan .. micnaheedu waa gabadhumarkasta oo ay musqusha aado ama ay caaddo ku dhacdo Waxaa ku hadha kaadida ama dhiiga meeshaas la awoy (la xiray),, taasna waxay keentaa jeermis iyo xanuun , iyo Meesha oo soo urta. Guddniinka Asturaad ama Nadaafad ma aha .

Waraaqdan Waxaa kuqoran in Meesha la furo (operation qaliin lagu sameeyo) oo sidii dabiiciga ahayd ee Allah ugu tala galay lagu sooceliyi oo la furo kaadimareenka iyo afka hore ee xubinta taranka. Hadafku waa meesha xanuunka xiliga caadada iyo xiliga galmada inuu ka joogsado, infekshinka iyo urkuna ka dhammaado.

A: waan grty ,maad isleedahay ninkaygu si kale u arki inaan Camaliyadaan sameeyo?

B: waxaaa aad u muhiim ah inaan kuwargelisid ninkaaga inaad qaliinka dib ufurid aad sameenesid, sidoo kale waxaa muhiim ah dhibaataada aad kala kulantid mar walba Meesha awdan , xilliga caadada ,xiliga isku taga iyo xanuunada oo dhan in aad u sheegto ninkaaga!

A: aad bey iigu adag tahay inaan fahansiiyo si uu hadalkeyga ugu qanco.

Ninkeygu ma idinla soo xiriirikaraa si aad ugu sharaxdiin waxaa laga yabaa inaa sifudud u fahamsiisaane?

B:Dabcan dalkan Austria mowduucan tixgalin badan ayuu siiyaa siiba dumarka iyo gabdhaha la soo guday iyo qoysaska ka imaada wadamada Gudniinka caanka ku ah, waxaa jira xarumo caafimaad sida ORIENT EXPRESS iyo xarunta caafimaadka eeDumarka iyo ururyo badan oo aad ka heli karto latalin khuseesa caafimaadka guud , nafsiyadeed iyo xaaladaha gaarka ah.

Waxaa diyaar kuugu ah lataliyaal sare oo u sharixikaro xaaladahan

A: Sidee buu ula xiriirikaraa?

B: waxuuna soo wicikaraa telefoon nambor .01601915201

Sidoo kale wax uu naga helikaraa QORAALO ku saabsan caafimaadka dumarka iyo gudniinka.

A: Mahadsanid

B: adaa mudan